



## Tallaalidda ilmahaaga

Talaalku waa hab sahlan oo ammaan ah oo wax ku ool ah oo looga ilaaliyo ilmahaaga cudurada halista ah ee keeni kara dhibaatooyinka caafimaad oo daran. Tallaalku wuxuu ka caawiyaa ilmahaaga inuu caafimaad qabo, bulshadana wuxuu ka ilaaliyaa iyadoo la yareeyo faafidda cudurka.

## Tallaaladu waa lacag la'aan halkan Australia

Jadwalka National Immunisation Program (NIP) Schedule waa tallaalo taxane ah oo la qaato waqtiyo gaar ah oo noloshaada oo dhan. Liiska NIP Schedule wuxuu qorayaa tallaalada ilmahaaga uu qaadanayo iyo goorta uu qaadanayo. Tallaalada ku qoran buugga NIP Schedule waa lacag la'aan.

Ka eeg [health.gov.au/immunisation](https://health.gov.au/immunisation) si aad u aragto NIP Schedule iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaalka oo Ingiriisi ah.

## Waxa aad u baahan tahay inaad sameyso

La hadal bixiyaha tallaalka ilmahaaga si loo hubiyo in ilmahaagu helo tallaalada ku qoran liiska NIP Schedule.

Marka ilmahaagu uu qaato tallaalka, weydii bixiyahaaga tallaalka inuu ku qoro Diiwaanka Australian Immunisation Register (AIR). AIR waa diiwaanka qaranka kaas oo diiwaan geliya talaalada la siiyo dadka da' kasta leh ee Australia.

## Arkidda taariikhda tallaalka ilmahaaga

Si aad u aragto diiwaanka tallaalka ilmahaaga, waxaad heli kartaa immunisation history statement. Taasi waxay kuu ogolaaneysaa inaad:

- sii wado raad-raaca tallaalkooda, iyo
- inaad siiso caddayn talaal oo loogu talagalay child care-ka ama dugsi ku-qorista.

Waxay kaloo muujinaysaa:

- markay tallaaladooda xiga ay ku eg yihiin
- tallaalka waqtigoodu dhacay, iyo
- ka-dhaafitaanka caafimaadka ee tallaalka.

Habka ugu dhaqsaha badan ee lagu heli karo caddaynta immunisation history statement waa online, adigoo isticmaalaya:

- Akoonkaaga Medicare online account adigoo usii maraya myGov, ama
- barnaamijka Express Plus Medicare ee mobile app-ka.

Wixi macluumaad dheeraad ah oo ku qoran Ingiriis, ka eeg halkan [humanservices.gov.au/medicareonline](https://humanservices.gov.au/medicareonline)

Haddii aadan xaq u laheyn Medicare, ma awoodi doontid inaad ka hesho caddayn online-ka. Taas bedelkeeda, waxaad:

- weydiisaa bixiyahaaga tallaalka inuu mid kuu daabaco
- Ka eeg Department of Human Services xaruunta adeegga, ama
- ku wac **1800 653 809** af Ingiriis.

Caddaynta Immunisation history statements keliya waxay qortaa liisaska talaalka oo ay ku diiwaangeliyeen AIR bixiyeyaasha tallaalka ee la aqoonsan yahay. Bixiyeyaasha tallaalka waxay ka shaqeeyaan meelo badan, oo ay ka midka yihiin dhaqaatiirta caafimaadka iyo xarumaha caafimaadka bulshada. Haddii caddaynta ilmahaagu khaldan tahay, la xirii bixiyaha talaalka waxaadna weydiisaa inay cusboonaysiiyaan AIR.

Faahfaahinta talaalka ee shakhsiyaadka 14 jirka ah ama ka weyn ayaa loo sii deyn karaa qofkaas. Haddii ilmahaagu 14 jir yahay ama ka weyn yahay, waxay u baahan doonaan inay helaan caddayntooda. Macluumaadkaan lama siin karo waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah ayadoo aysan ogolaan ilmahaaga, xitaa haddii aad ku qoran tahay isla kaarka Medicare.

## Lacag-bixinta tallaalka iyo caawimaada qoyska

Tallaalada ilmahaaga ayaa saameyn kara haddii aad qaadanayso lacagaha caawimaadda qoyska. Hubi inuu ilmahaagu qaatay talaalada ay u baahan yihiin ee ka socda NIP Childhood Schedule (dhalashada ilaa 4 sano) si aad u hesho:

- Family Tax Benefit Part A
- 2017–18 Family Tax Benefit Part A supplement
- Child Care Subsidy
- Additional Child Care Subsidy
- Child Care Benefit ama Child Care Rebate oo ah lacag hal mar ah ee 2017-18.

Uma baahnid inaad noo sheegto marka ilmahaaga la tallaalayo - waxaan ka eegi doonaa xaaladdooda AIR.

## Tallaallada dibedda ah

Haddii ilmahaagu talaalada dibada ku soo qaatay, ugee caddaynta tallaalka (oo lagu tarjumey Ingiriisi) bixiyahaaga talaalka ee Australia. Waxay hubin doonaan ilmahaaga in la siiyay talaalada saxda ah si loo buuxiyo jadwalka NIP Schedule (dhalashada ilaa 4 sano).

Haddii ilmahaagu buuxiyo shuruudaha, bixiyaha talaalka Australia, markaas bixiyaha talaalka Australia wuxuu cusbooneysiin doonaa AIR.

Haddii ilmahaagu aanu buuxin shuruudaha, bixiyaha tallaalka wuxuu kugula talin doonaa catch-up schedule ee tallaalada.

Haddii aad dhawaan timid Australia oo aad u baahan tahay caddaynta tallaalka ilmahaaga oo la turjumey, wax badan ka sii akhri ah oo ku saabsan [Adeegga Turjumidda ee lacag la'aanka ah](#) af Ingiriis ku qoran website-Department of Social Services.

## Ka-dhaafitaanka caafimaadka talaalka

Carruurta qaarkood lama talaali karo sababtoo ah xaalad caafimaad, ama aan u baahnayn tallaalka haddii ay qabaan difaac dabiici ah oo cudurka ah. Dhakhtar u qalma ayaa ku qori kara ka-dhaafitaanka talaalka AIR.

Macluumaad dheeraad ah oo ku qoran af Ingiriis oo ku saabsan ka-dhaafitaannada daaweynta ee tallaalka, oo ay ku jiraan liiska dhakhaatiirta uqalma, waxaad ka eegtaa [humanservices.gov.au/medicalexemptions](https://humanservices.gov.au/medicalexemptions)

## Wixii macluumaad dheeraad ah

- ka eeg [humanservices.gov.au/air](https://humanservices.gov.au/air)
- ka eeg [humanservices.gov.au/yourlanguage](https://humanservices.gov.au/yourlanguage) halkaas oo aad ka akhrisan karto, ka dhageysan karto ama ka daawan karto macluumaadka luqaddaada ah
- wac **131 202** si aad noogula hadashid luqaddaada wax ku saabsan Centrelink lacag-bixinada iyo adeegyada
- wac Translating and Interpreting Service (TIS National) taleefanka **131 450** si aad noogula hadashid luqaddaada wax ku saabsant Medicare iyo Child Support lacag-bixinada iyo adeegyada
- Ka eeg xaruuunta adeegga.

**Xusuusin:** wicitaanada telefankaaga guriga loo wado lambarada '13' meel kasta oo ka mid ah Australia waxaa lagu soo dalacayaa lacag go'an. Sicirkaasi way ukala duwanaan kartaa qiimaha wicitaanka deegaanka waxaana laga yaabaa inay ku kala duwanaato adeeg bixiyayaasha telefoonka. Wicitaanada lambarrada '1800' oo laga waco telefankaaga guriga waa lacag la'aan. Wicitaanada teleefonada dadweynaha iyo moobaylka waxaa laga yaabaa in la waqtiyeeyo oo lagu dallaco sicir sare.

## Afeef

Macluumaadka ku jira daabacaadan waxaa loogu talagalay oo keliya tilmaame ahaan lacag-bixinnada iyo adeegyada. Waa masuuliyadaada inaad go'aan ka gaarto haddii aad rabto inaad dalbato lacag bixinta iyo inaad sameyso codsi ku saabsan duruufahaaga gaarka ah.



## Immunising your child

Immunisation is a simple, safe and effective way to protect your child against harmful diseases that can cause serious health problems. Immunisation helps your child stay healthy and protects the community by reducing the spread of disease.

### Free immunisations in Australia

The National Immunisation Program (NIP) Schedule is a series of immunisations given at specific times throughout your life. The NIP Schedule lists which vaccines your child should get and when. Vaccines listed on the NIP Schedule are free.

Go to [health.gov.au/immunisation](http://health.gov.au/immunisation) to view the NIP Schedule and more information about immunisation in English.

### What you need to do

Talk to your child's vaccination provider to make sure your child gets the vaccines listed on the NIP Schedule.

When your child gets a vaccine, ask your vaccination provider to record it on the Australian Immunisation Register (AIR). The AIR is a national register that records vaccines given to people of all ages in Australia.

### Viewing your child's immunisation history

To see your child's immunisation record, you can get an immunisation history statement. This allows you to:

- keep track of their immunisations, and
- provide proof of immunisation for child care or school enrolment.

It also shows:

- when their next vaccines are due
- overdue vaccinations, and
- immunisation medical exemptions.

The quickest way to get an immunisation history statement is online, using:

- your Medicare online account through myGov, or
- the Express Plus Medicare mobile app.

For more information in English, go to [humanservices.gov.au/medicareonline](http://humanservices.gov.au/medicareonline)



If you are not eligible for Medicare, you will not be able to access a statement online. Instead, you can:

- ask your vaccination provider to print one for you
- visit a Department of Human Services service centre, or
- call **1800 653 809** in English.

Immunisation history statements only list immunisations that have been recorded on the AIR by recognised vaccination providers. Vaccination providers work in many places, including medical practices and community health clinics. If your child's statement is incorrect, contact your vaccination provider and ask them to update the AIR.

Immunisation details for individuals 14 years of age or over can only be released to that person. If your child is 14 years or over, they will need to access their own statement. This information cannot be provided to a parent or guardian without your child's consent, even if you are listed on the same Medicare card.

## Immunisation and family assistance payments

Your child's immunisations can affect whether you get family assistance payments. Make sure your child has the immunisations they need from the NIP Childhood Schedule (birth to 4 years) for you to get:

- Family Tax Benefit Part A
- 2017–18 Family Tax Benefit Part A supplement
- Child Care Subsidy
- Additional Child Care Subsidy
- Child Care Benefit or Child Care Rebate as a lump sum for 2017–18.

You do not need to tell us when your child is immunised—we will check their status on the AIR.

## Overseas vaccinations

If your child received vaccinations overseas, take proof of these (translated into English) to your Australian vaccination provider. They will check your child has been given the correct vaccinations to meet the NIP Schedule (birth to 4 years).

If your child meets the requirements, your Australian vaccination provider will update the AIR.

If your child does not meet the requirements, the vaccination provider will recommend a catch-up schedule of vaccinations.

If you have recently arrived in Australia and need your child's immunisation evidence translated, read more about the [Free Translating Service](#) in English on the Department of Social Services website.

## Immunisation medical exemptions

Some children cannot be immunised because of a medical condition, or may not need a vaccine if they have natural immunity to a disease. An eligible doctor can record an immunisation exemption on the AIR.

For more information in English about immunisation medical exemptions, including a list of eligible doctors, go to [humanservices.gov.au/medicalexemptions](https://humanservices.gov.au/medicalexemptions)

## For more information

- go to [humanservices.gov.au/air](https://humanservices.gov.au/air)
- go to [humanservices.gov.au/yourlanguage](https://humanservices.gov.au/yourlanguage) where you can read, listen to or watch information in your language
- call **131 202** to speak with us in your language about Centrelink payments and services
- call the Translating and Interpreting Service (TIS National) on **131 450** to speak with us in your language about Medicare and Child Support payments and services
- visit a service centre.

**Note:** calls from your home phone to '13' numbers from anywhere in Australia are charged at a fixed rate. That rate may vary from the price of a local call and may also vary between telephone service providers. Calls to '1800' numbers from your home phone are free. Calls from public and mobile phones may be timed and charged at a higher rate.

## Disclaimer

The information contained in this publication is intended only as a guide to payments and services. It is your responsibility to decide if you wish to apply for a payment and to make an application with regard to your particular circumstances.